

TILMAAMAHA LA SIINAYO BUKAANKA OO KU SAABSAN SIDA SAMBAL LOO QAADO


INTA AADAN BILLAABIN

Dhakhtarkaada ayaa ku weeydiyay in aad baaritaankan kusoo qaado sida ugu dhakhso badan ee suurtoogalka ah. Ha qaadin tijaabada xilliga aad caadada qabto ee sug illaa ay ka istaagto kadibna tijaabada qaad. Fadlan isticmaal qalin buluug ama madoow ah.

baaritaan laga qaadayo Dhiigga Saxarada (faecal Immunochemical Test), waa baaritaan lagu eegayo in uu dhiig ku jiro saxarada kaas oo aad u yar oo aan si caadi ah loo arki karin.

Dhakhtarkaada ayaa baaritaankan kuu amray, taas oo qayb ka ah baaritaan lagu sameeynayo calaamadaha xanuun ahaan ku haayo, si xilli hore meesha looga saaro in uusan Kansar jirin. Dhakhtarkaada u sheeg haddii aad safar ama fasax aadeeyso. Qalabka wax lagu baarayo waxaa kamid ah tuunbo baaritaanka lagu qaado, kiish ama boorso cagaaran iyo foom codsi. Waa in aad sameeysaa tijaabada uguna soo celisaa dhakhtarkaada cudurada guud sida ugu dhakhso badan ee suurtoogal ka ah. Fadlan u raac tilmaamaha si tillaabo-tillaabada ah si aad saxarada u qaado (saxaro).

1. Calaamadeey sambalka aad qaadday



Bukaanada ka imaanayo Sutton, Merton, Richmond, Kingston, Wandsworth iyo Surrey Downs (Epsom & East Elmbridge); wixii aad ku calaamadeeyn lahaydeen waxay la socdaa Foomka codsiga. Calaamadda ka Fuji oo ku dhaji tubbada tijaabada. Fadlan hubi in ay sax yihiin, kadibna ku qor **TAARIKHDA** aad saxarada qaadday adigoo ku qorayo meesha loogu talagalay ee foomka codsiga dushiisa ah.

Bukaanada ka imaanayo Croydon: fadlan ku qor (N) **Magac**, (A) **TAARIKHDA DHALASHADA** iyo (D) **TAARIKHDA** aad qaadday saxarada adigoo ku qorayo meesha loogu talagalay ee foomka codsiga dushiisa ah.


3. Sambal saxaradaada ah kusoo qaad sheeyga wax lagusoo qaado

Tuunbada sambalka lagu qaado kor ka fur adoo u wareejinayo qaab lid ku ah sida Saacaddu u shaqeeysa (anti-clockwise), usha kasoo saar **kadibna dhinaca dambe ee usha ku xoq lana raac saxarada illaa dhammaan jeexdimaha ay qarsoomaan**. In aad u yar oo saxarada kamid ah kaliya ayaa loo baahanyahay in ay usha dusha kaga taallo.

2. Sidee loo qabtaa sambalka saxarada



Waa muhiim in sambalka saxaradaadu aysan taaban biyaha musqusha.




4. Dabool oo xir tuubada sambalka baaritaanka



Usha sambalka dib ugu celi tubbada. Hubi in aad xirto tubbada kadibna gali Balaastikada bacda ah adoo la galinayo foomka Codsiga. Fadlan hubi in aad ku qortay taariikhda Sambalka la qaaday.

Ha illoobin in aad gacmaha iska dhaqdo!

5. Sambalkaada geey




Sambalkaada iyo foomka codsiga u geey Dhakhtarkaada Cudurada Guud oo u dhiib xafiiska soo dhaweeynta uguna geey muddo 3 maalmood gudahood ah kadib markii ay dhakhtarkaada kaa soo gaaraan.

6. Natijada

Muddo 7 maalmood gudahood ah ayeey jawaabtu kusoo gaareysaa Dhakhtarkaada weeyna kulasoo xiriirayaan markaas si ay jawaabta kuu gu sheegaan haddii aad sidaas isku ogeeydeen markii aad latashiga ugu tagtay.

Taariikhda meel ku qoro oo haddii muddo 2 todobaad gudahood aadan wax akhbaar ah uga helin dhakhtarkaada, fadlan iyaga la xiriir.

Haddii natijada baaritaankaadu uu caadi yahay oo aan waxba laga helin walina aad calaamadihii xanuunka dareemeeyso, fadlan dhakhtarkaada la xiriir si aad ballan u sameeysato.



FADLAN HUBI IN AAD SAMEEYSAY TALLAABOYINKAN OO DHAN. SAMBALKAADA U GEEY DHAKHTARKAADA CUDURADA GUUD UNA DHIIB XAFIISKA SOO DHAWEEYNTA